

# ALLEMANSRÄTTEN

Allemansrätten = Ha carqaladayn, ha burburin.

## Hordhac

Allemansrätten (Xuquuqda dadwaynuhu) waa wax aynu ku haysanno Iswiidhan, oo innoo saamaxaya inaynu baranno oo dhex soconno bay'adda dabiiciga ah. Waa tan waxa innoo ogolaada inaynu ku ciyaarno kaynta, ku dabaalanno xeebta oo aynu guranno ubaxyo, midho iyo barkin-waraabe, haddii aanay ahayn kuwa ilaashan. Waxaynu xitaa seexan karnaa bannaanka dabiiciga ah haddii aynu rabno, xuquuqda allemansrätten awgeed.

Laakiin xuquuqda allemansrätten ma aha oo kaliya xuquuq, laakiin sidoo kale waxa ka mid ah waajibaad. Markaynu joogno deegaanka dabiiciga ah, waxa muhiim ah in aynu tixgelinno deegaanka, duurjoogta, mulkiilayaasha dhulka iyo dadka kale ee soo booqda.

Tusaale ahaan, lama oggola inaad dhaafto xerooyinka, beeraha, dhirta la beertay ama beeraha dalagga ee beeran. Sidoo kale laguuma ogola inaad gawaadhida matoorka leh ku dhex gooshto deegaanka dabiiciga ah.

Qashinka bini'aadamka looma oggola deegaankan sababtoo ah xayawaanka waxa ku dhegi karaan bacaha, waxay isku dhaawaci karaan jjabka quraarad ama waxay cuni karaan waxyaabo khatar ah iyagoo u malaynaya inay cunto tahay. Sidaa darteed waxaa muhiim ah in aynu mar walba qaadano dhammaan qashinkeenna oo aynu ku tuurno meesha saxda ah. Waxaad xataa ka qaadi kartaa qashin cid kale ka tagtay, haddii aad aragto. Waxaynu wadajir u qaadi karnaa mas'uuliyadda in xuquuqda allemansrätten ay u ii shaqeyso sidii loogu talagalay.

## Seerayaasha dabiiciga ah iyo xadiiqado qaran

Dalka Iswiidan waxaa ku yaalla seerayaal dabiici (natur-reservat) iyo xadiiqado qaran (nationalparker). Waxay kuwan loo sameeyay si loo ilaaliyo oo loo kaydiyo bay'adaha dabiiciga ah ee qiimaha leh. Waa muhiim in maskaxda lagu hayo in ay jiri karaan sharciyo gaar ah oo saameyn kara Allemansrätten marka la joogo seeraha dabiiciga ah iyo xadiiqadaha qaranka. Waa hawshaada booqde ahaan inaad ogaato waxyaabaha khuseeya meesha aad booqasho dibadeed u tagayso. Xeerarka khuseeya seeraha dabiicadda ama xadiiqadaha qaranka waxa inta badan laga heli karaa calaamadaha goobta, ama iyadoo lala xidhiidho maamulka degmada ama maamulka gobolka.

## Teendho

Ma jiraan wax badan oo ka fiican in habeen lagu qaato deegaanka dabiiciga ah. Allemansrätten awgeed waxaad hal habayn ama dhowr habayn teendho ku seexan kartaa qof kale dhulkiisa, haddii aad tihiin dhowr qof. Xusuusnow in aanad teendhada ka taagin meel u dhow guri ay dad ku nool yihiin oo aad halis ugu jirto inaad iyaga carqaladayso. Lama ogola in la qodo, la dhiso ama si kale loo beddelo deegaanka dabiiciga ah si loo hagaajiyo goobta teendhada. Haddii aad rabto in aad koox ahaan degtaan ama aad qorshaynayso in aad dhawr habeen joogtid, soo ogow cidda dhulka iska leh oo marka hore waydiiso.

## Kalluumaysi

Haddii aad rabto in aad nasiibkaaga ku tijaabiso kalluumaysi, waxa fiican inaad ku kalluumaysato qalabka gacanta, khadka xeebaha iyo shanta haro ee ugu waaweyn Vänern, Vättern, Hjälmaren, Mälaren iyo Storsjön. Kalluumaysiga biyaha kale wuxuu u baahan yahay kaadhka kalluumaysiga ama ogolaansho kale.

## Nadaafadda iyo qashinka

Haddii aad rabto inaad qubaysato ama aad dhaqdo weelka cuntada, waxaad isticmaali kartaa laagaha biyaha ee aga-gaarka. Haddii aad qubaysanayso waxa muhiim ah inaad isticmaasho saabuun iyo shaambooo aan waxyeello u lahayn deegaanka. Saabuunta weelkuna waa sidaasoo kale. Waxa fiican in berriga lagu dhaqo weelka oo meel biyaha ka durugsan lagu daadiyo biyaha uskagga ah. Waxay tani keenaysaa in dhulku sii shaandheeyo biyaha ka hor intaanay dib ugu soo noqon harada, badda ama webiga.

Ha kaga tagin wax qashin ah, hadhaa cunto ama waxyaabo nadaafad shakhsi deegaanka dabiiciga. Waxa fiican inaad isticmaasho musqulaha dadweynaha, haddii kale waxaad godad ku qoddaa majarafad-musquleedka aad wadato oo xaajadaada ku gudataa. Waxa fiican in warqadaha lagu qaado bac oo lagu tuuro qashinka ee kuugu dhow. Qofna ma jecla in uu la kulmo warqad xaar oo duulaysa deegaanka dabiiciga.

## Dab shiditaanka deegaanka dabiiciga

Haddii calooshu madhan tahay oo aad rabto inaad wax cunto, deegaanka dabiiciga ah waa meesha ugu fiican ee lagu kariyo cunto aad u macaan. Dabcan waxa cuntada lagu karsan karaa girgiraha aad wadato, laakiin allemansrätten waxay sidoo kale kuu saamaxaysaa inaad dab ku shidato deegaanka dabiiciga ah haddii aanay ka jirin mamnuucid dabshid meesha aad joogto. Dabka la shidayo waa in had iyo jeer qaab ammaan ah loo shidaa. Had iyo jeer la joog qof weyn ha raaco. Dooro meel aan khatar ugu jirin in dabku ku faafo. Weligaa ha ku shidin sallax dushii oo ay ka jirto khatar dhaawac u gaysanaysa deegaanka dabiiciga.

Waxa fiican inaad sii qaadato xaabadaada maaddaama oo laamaha dhulka ku daadsan u noqon karaan guryo iyo qalab dhismeed xayawaanka kala duwan. Weligaa laamo ha ka soo goyn geedaha nool.

Waxa muhiim ah inaad dabka agtiisa biyo badan ku haysato. Dabka si fiican u dami ka hor inta aanad ka tagin, adigoo inuu dambasoobo u oggolaanaya ama ku bakhtiinaya ciid ama carro. Dabadeed biyo badan ku shub oo iska hubi in aanay dhamac ama qiiq ku hadhayn.



FRILUFTS  
FRÄMJANDET

